#### 6.1.4. Kaydka ku -talo galka Dhacdooyinka lama filaanka (*Contingency fund*),

Si qaranku uga gaashaaman karo intii awoodiisa ah arrimaha bani aadanimo ee dunida ka dhaca kuwaas oo ay sababaan sida: Fatahaadaha, Duufaanadda, Abaaraha, Xanuunadda iyo wax kasta oo lama filaana, waxa miisaaniyadda 2020 looga qoondeeyay kharash lagula tacaalo arrimaha lama filaanka ah hadii ay dhacaan.

#### 6.1.5. Joojinta qaadista lacagaha aan sharciga ahayn (illegal fees)

Iyadda oo la fulinayo Xeerka Maamulka Maaliyadda Qaranka, waxay Siyaasadda Miisaaniyadda 2020 xanbaarsan tahay in aaney Wasaarad aan ahayn Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu qaadi karin lacag la xidhiidha adeega loo qabanayo Muwaadinka.

#### 6.1.6. Fududeynta Nidaamka Cashuur bixinta.

Siyaasadda Miisaaniyadda 2020 waxay dhiirigalinaysaa fududeynta nidaamka Cashuur bixinta, taasi oo qofka Cashuurta ku waajibtay si sahlan u bixin doono Cashuurta. Siyaasaddani waxay sidoo kale Hindiseysaa in la dhaqan-galiyo Nidaamka Cashuurbixinta ee la adeegsanyo Mobile-ka iyo isku-gudbinta Xisaabaha Baananka (E-Payment System)

#### 6.1.7. Hirgalinta dhamaan qaybaha Nidaam Xisaabeedka is-wada ee (SLFMIS)

Sidaan wada ognahay waxa qaab-xisaabeedka dowladda lagu isticmaala nidaamka iswada ee Somaliland Finacial Information System (SLFMIS), sidaa awgeed waxa Miisaaniyadda 2020 qorshaysan in la dhaqan galiyo dhamaan qaybaha kale ee uu ka kooban yahay nidaamka SLFMIS-ku.

### 6.1.8. Diiwaangalinta Cashuur Bixiyayaasha.

Iyadoo laga duulayo in la helo xog dhamaystiran oo ku saabsan dhamaan Cashuur bixiyayaasha ayaa Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda waxa u qorshaysan inay diiwaan galiso dhamaan Cashuur bixiyayaasha isla markaana loo samaynayo Sumada Aqoonsiga Cashuur bixiyaha ee loo yaqaano TIN (Taxe Identification Number)

## 6.2. Siyaasadda lacageed (Monetary policy)

### 6.2.1. Sicir bararka:

Siyaasadda Miisaaniyadda 2020 waxay xooga saaraysaa xakamaynta sicir-barbarka, iyadoo yoolka Wasaaradda horumarinta Maaliyadda iyo Bangiga dhexe yahay in lagu hayo sicir barbarka 5%-6%, taasoo la dhaqan galiyay siyaasado lagu xakamaynayo sicir bararka- Sida:

- in isticmaalka shilling ka Somaliland la xoojiyo isla markaana shay kasta oo Dowladdu iibsano lagu iibsado shilinka somaliland
- in lacagaha electoric ah ee lagu dhex isticmaalo mobile-da aan la iskugu diri Karin wax ka yar \$100

### 6.2.2. Isku bedelka Sarifka lacagaha

Siyaasada Miisaaniyadda ee 2020 waxay xooga saaraysaa siyaasada lacageed ee dhanka safirka lacagaha, taasi oo la doonaya in sarifka lagu hayo 8,000-8,500 slsh

### 6.2.3. Isku soo dhawaynta sarifka suuqa iyo ka dowladda

Waxa jira farqi u dhexeeya sarifka suuqa iyo ka dowladda, sidaa awgeed si loo yareeyo faraqa u dhexeeya sarifka lacagaha waxay siyaasada Miisaaniyadda 2020 xooga saaraysaa in la isku soo dhaweeyo safirka suuqa iyo ka dowladda.

## 6.3. MUDNAANTA MIISAANIYADDA 2020 (budget priorities)

Wadaagayasha mudnaanta la siinayo Miisaaniyadda 2020 (Sectorial priorities)

Gudidda siyaasada Miisaaniyadda Qaranku iyagoo raacaya Qorshaha guud ee Qaranka (NDP2) iyo wadaagayaashii mudnaanta la siiyay Miisaaniyadii 2019, waxay gudidda siyaasada Miisaaniyadu Mudnaanta siiyeen sanad Miisaaniyadeedka 2020 wadaagayaashan hoos ku xusan.

### 6.3.1. Nabadgalyada:

Nabad galyadu waxay kow ka tahay qodobada mudnaanta la siiyay Siyaasadda Miisaaniyadda 2020. Si hadaba loo adkeeyo Nabad galyada, waxa Miisaaniyadda 2020 loo qoondeeyay Hay'addaha ku shaqada leh Nabadgalyada Miisaaniyadda kor loogu qaadayo adeega nabad galyada ee ay qabtaan sida:

- Tayaynta iyo kordhinta Ciidamada
- Qalabaynta Ciidamada
- Dhismayaaasa Jeelasha
- Dhismayaasha Saldhigyada, Rugaha iyo Qaybaha booliska
- Dhismayaasha Cusbitalada Ciidamada

### 6.3.2. Ictiraafka:

Tan iyo markii ay Somaliland madax banaaniideeda la soo noqotay, waxay ku hawlanayd sidii ay beesha caalamka ugu heli lahayd Ictiraaf. hadaba si looga midho dhaliyo dedaalka xukuumadu ugu jirto Ictiraaf raadinta, waxa Miisaaniyadda Wasaaradda Arrimaha Dibeda ee 2020 guud

ahaanna la kordhiyay **4%** marka loo eego Sanadka 2019, halka kharashka Ictiraaf raadinta la kordhiyay **56.7 %**. Meelaha mudnaanta gaarka ah la siiyay waxa ka mid ah

- Kordhinta kharashka Ictiraaf raadinta
- Furista Safaarado iyo Qunsuliyado cusub
- Tayaynta iyo xoojinta Safaaradihii iyo Qunsuliyadihii hore
- Kordhinta tirada shaqaalaha Wasaaradda arrimaha dibeda

### 6.3.3. Doorashooyinka

Somaliland waa astaan kamida dalalka u taagan dimuqraadiyada Qaarada Afrika, isla markaana ay ka dhaceen Doorashooyin badan oo xor iyo xalaal ah, kuwaasi oo magac iyo maamuus ba u keenay qaranka.

Hadaba, sidaan wada ognahay waxa inagu soo fool leh qabsoomidda Doorashooyinka Golaha Wakiilada iyo Dowladdaha hoose, taasi oo Dowladdu u qoondaysay kharash dhan 28,800,000,000 sl sh (sideed iyo labaatan bilyan iyo sideed boqol oo milyan)

### 6.3.4. Caafimaadka.

Caafimaadku waa baahiyaha aasaasiga ah ee Aadamaha, sidaa awgeed iyadoo laga duulayo Qorshaha Qaranka (NDP2) iyo Hiigsiga Qaranka ee 2030 ee ku waajihan tayaynta iyo kor u qaadida adeega Caafimaadka, waxay Miisaaniyadda Sanadka 2020 ay muhiimad weyn siinaysaa horumarinta adeega caafimaadka Bulshada, taasi oo laga dheehan karo qoondada ay ugu talo gashay in adeega W.Caafimaadka kor loogu qaado isla markaana la kordhisay **17.65% Miisaaniyadda 2020.**

Sidaa darteed waxa mudnaan gaara la siiyay Mashaariicdan hoos ku xusan:

- Dhismayaasha Xarumaha caafimaadka (Health clinics)
- Dhismayaasha Xanaanooyinka hooyada iyo dhalaanka
- Iibsiga qalabka Caafimaadka ee kala duwan
- Shaqaalaysiinta Dhakhaatiirta takhasusaadka gaarka leh sida: Nerphologist, Urologist, Radiologist iyo Anesthesiologist
- Ku darida Miisaaniyadda saamiga dowladda laga rabo Mashaariicda adeega caafimaadka kor loogu qaadayo ee Ceerigaabo iyo laascaanood oo ah (70%)
- Iibsiga Gaadiidka adeega Caafimaadka (Ambulances)
- Gunaynta dhakhaatiirta iyo kalkaaliyayaasha Caafimaadka ee dhakhtarada baligubade, kala baydh iyo Xariirad
- Gunaynta dhakhaatiirta iyo kalkaaliyayaasha Caafimaadka ee Cusbitalada TB ee Gobolada

### 6.3.5. Waxbarashada

Miisaaniyadda 2020 waxay muhiimad weyn siinaysaa tayada adeega waxbarashada gaar ahaan dugsiyada dowladda, taasi oo ka muuqata korodhka loo kordhiyay Miisaaniyada Wadaagaha waxbarashada **34%**. Meelaha ay mudnaanta gaarka ah siinayso miisaaniyadda 2020 ee dhanka waxbarashada waxa ka mid ah

- Kordhinta Mushaharka macalimiinta dugsiyada hoose iyo dhexe **25%**
- Qorista macalimiin cusub.
- Dhismayaasha iyo daryeelka dugsigayada dowladda
- Shaqaalaysiinta 300 oo macalin oo kuwa dugsiyada hoose, dhexe iyo sare ah
- Dhismayaasha dugsiyada farsamada gacanta
- Tayaynta kuuliyadda tobabarka macalimiinta

- Ku darida saamiga dowladda laga rabo Mashaariicda adeega Waxbarashada kor loogu qaadayo ee Dayaxa iyo laascaanood, kuwaasi oo laga maalgalinayo sanduuqa Somalind development fund (SDF) iyo Miisaaniyadda dowladda dhexe

### 6.3.6. Biyaha

Miisaaniyadda 2020 waxay muhiimad gaara siinaysaa wax ka qabadka baahiyaha biyo yaraanta ee ka jirta deegaanada dalka, si hadaba loo yareeyo baahiyaha biyo yaraanta waxa la kordhiyay Miisaaniyadda Wasaaradda Horumarinta Biyaha **65%**.

Mashaariicda Biyaha

- Qodista ceelasha
- Biyo xidheeno
- Sand dams
- Dareeylka iyo tayaynta ceelashii hore

### 6.3.7. Garsoorka

Sidaan wada ognahay Cadaaladu waa mid ka mid ah tiirarka ugu weyn ee Nabada, isla markaana loo baahan yahay in la daryeelo oo la tayeeyo. Xafiisyada bahda Garsoorka Waxa Miisaaniyadda 2020 loo qoondeeyay kharash wax lagaga qabanayo baahiyaha Xafiisyada bahda garsoorka taasi oo isugu jirta Daryeelida Xafiisyada Maxkamadaha hoose, Maxkamada sare iyo Xafiisyada Xeer ilaalinta Guud.

### 6.3.8. Maamul Daadajinta.

Waxa Miisaaniyadda 2020 mudnaan gaara ay siinaysaa maamul daadajinta, taasi oo la doonayo in adeegyada kala duwan ee dowladdu si fiican u wada gaadho dhamaan deegaanada Jamhuuriyadda Somaliland.

Sidaa awgeed, waxa miisaaniyadda 2020 loo qoondeeyay kharash loogu talo galay fidinta Maamul daadajinta, taasi oo badi Wasaaraddaha iyo Hay'adaha kala duwan ee dowladda loo galiyay dhismayaal ay ka dhisanayaan gobolada iyo degmooyinka dalka, halka qaar kale oo badana loo galiyay kharash kiro ijaar oo ay ku kiraystan Xafiisyada Gobolada iyo Dagmooyinka.

Sidoo kale, siyaasada Miisaaniyadda 2020 waxay mudnaan siinaysaa Mashaariicda maamul daajajinta ee ay ka wada shaqeeyaan dowladdaha hoose iyo dowladda dhexe, isla markaana dowladdu ku dartay Miisaaniyadda 2020 qoondadii laga rabay Mashaariicda maamul daadajinta ee (JPLG), waxa kale oo Dowladu si gaara kharash ugu qorshaysay sadex degmo oo barriga ah oo aan Mashruuca JPLG hore ugu jirin, balse Dowladdu fulin doonto

### 6.3.9. Horumarinta Dhalinyarad iyo Shaqo abuurka

Miisaaniyadda 2020 waxay muhiimada gaara siinaysaa Horumarinta Dhalinyarada iyo shaqo abuurka, sidaa daraadeed waxa Miisaaniyadda 2020 looga qoondeeyay qoondo loogu talo galay in lagu horumariyo dhalinyarada isla markaana lagu yareeyo shaqo yaraanta sida:

- Shaqaalaysiinta 1,400 oo dhalin yaro ah, kuwaas oo dhamaystay Mashruuca Shaqo Qaran iyo qaadashada 700 oo cusub oo loo qaadanayo Shaqo Qaran.
- Dar-dar galinta Sanduuqa horumarinta dhalinyarada kaasoo sanadkii hore la aasaasay jooqtan noqon doona.
- Dhamaystirka Garoonka ceerigaabo
- Dhismaha Garoonka Caynabo
- Dhismaha Garoonka Oodweyne
- Dhismaha Garoonka Baligubadle

- Qabashada tartanka koobka gobol
- Dhamaystirka garoonka laascaanood
- Fidinta iyo tayanta Xafiisyada shaqo abuurka ee job centers-ka

### 6.3.10. Warshadaha iyo Maalgashiga

Warshadaha waxay door laxaad leh ka qaataan kobaca dhaqaala dalka iyo shaqo abuurka, sidaa awgeed waxa Miisaaniyadda 2020 ay mudnaan gaara siinaysaa Maalgashiga dalka dibadiisa iyo gudahiisa (investment) iyadoo wixii Maalgashiya dowladdu u fududayn doonta dhamaan wixii dowladda ku xidhan sida bilaabida maalgashiga (ease of doing business).

Sidoo kale, waxa Miisaaniyadda 2020 ay si gaara mudnaanta u siinaysaa samaynt dhul dowladdu leedahay oo loogu talo galay warshadaha (**Industrial Zone**). taasi oo wax weyn ka tari doona baahidii helida dhulka iyo yaraynta kharashka abuurida Ganacsiga (**start-up cost**)

### 6.3.11. Ilaalinta Deegaanka iyo ku talo galka Dhacdooyinka lama filaanka

Miisaaniyadda dowladda ee 2020 waxay mudnaan gaara siinaysaa ilaalinta deegaanka, hadaba si loo helo deegaan bad qaba oo ka fayow afooyinka dhibta ku haya deegaanka waxa Miisaaniyadda 2020 loo qorsheeyay mashaariic horumarineed oo wax lagaga qabanayo deegaanka sida:

- Mashruuca wax ka qabadka xaalufka
- Daryeelka Ugaadha iyo Deegaanka
- Mashruuca Dhiraynta
- Mashruuca Seereyaasha Bancawl iyo Casuura
- Mashruuca daryeelka duurjoogta

### 6.3.12. Waxsoo-saarka

#### 6.3.12.1. Xoolaha iyo Kalluunka

Xoolaha nooli waa laf dhabarta Dhaqaalaha Dalka, sidaa awgeed Miisaaniyadda 2020 waxay mudnaan gaara siinaysaa daryeelka xoolaha iyo kalluunka, taasi oo ka muuqata korodhka Miisaaniyadda oo dhan 29%, mashaariicda xoolaha iyo kalluunka wax ka mid ah sii wadida Mashaariicdii hore loo hirgaliyay iyo abuurida kuwa cusub sida:

- Mashruuca taranka xoolaha
- Mashruuca xoolo qaybinta (restocking)
- Mashruuca daaweynta xoolaha
- Iibsiga qalabka baraf dhaliyayaash iyo qaboojiyayaasha
- Iibsiga doonyaha kalluumaysiga iyo laashashka
- Dhismayaasha Xafiisyada Kalluumaysiga
- Iibsiga qalabka shaybaadhka Xoolaha

#### 6.3.12.2. Beeraha

Sida ku cad Qorshaha Qaranka (NDP2) iyo hiigsiga 2030 ee Qaranka oo sheegeya in sanad kasta aynu kordhino dhulka aynu wax ka beerano si aynu quudkeena ula soo baxno isla markaana u gaadho isku filnaasho dhanka wax soo saarka ah. Hadaba, Miisaaniyadda 2020 waxa loo qoondeeyay mashaariic horumarineed oo kor loogu qaadayo wax soo saarka dalka gudahiisa sida:

- Mashruuca Beer, wajaale iyo Oodweyne
- Mashruuca abuur badinta



- Mashruuca fidinta beeraha
- Mashruuca bad-baadada beerah
- Mashruuca bad-baadada beeraha
- Mashruuca Xog ururinta Beeraha

### 6.3.13. Horumarinta Tiknolojiyada (ICT)

Miisaaniyadda 2020 waxay xooga saaraysaa kobcinta iyo tayaynta adeega Tiknoolajiyada, taasi oo kordhin doonta horumarka dalka, Sidaa awgeed waxa Miisaaniyadda 2020 loo qoondeeyay Mashaariic lagu horumarinayo Tiknolojiyada sida:

- Iibsiga qalabka isgaadhsiinta
- Hirgalinta e-government
- Kharashka raadinta furaha dal ku galka
- Samaynta xarunta (ICT Centar)
- Samaynta siyaasada ICT

## 7. Mashaariicda 2020


Lacagta loo qoondeeyay in lagu hirgaliyo Mashaariic Miisaaniyadda 2020 waa 376,246,245,316\$sh una dhiganta 18.36% waana kuwan hoos ku xusan:

| MDAs  | No | Name   |
|---|----|--|
| <b>Ciidanka Asluubta</b>                                | 1  | Dhismaha Jeelasha Boorama, Salaxlay iyo Gebilay                    |
| <b>Ciidanka Booliska</b>                                | 1  | Dhismayaasha saldhigyada iyo Rugaha                                |
| <b>Ciidanka Dabidemiska</b>                             | 1  | Dhismahayaasha xarumaha Burco, Boorama iyo Wajaale                 |
| <b>Ciidanka Qaranka</b>                                 | 1  | Dhismaha taliska Ceerigaabo iyo Cusbataalka Ciidanka               |
| <b>Guddida Doorashooyinka</b>                           | 1  | Doorashooyinka   |
| <b>Hanti-dhawraha Guud</b>                              | 1  | Dhismaha Xafiiska Hantidhawrka                                     |
| <b>Hay'adda Duulista iyo Madaaradda</b>                 | 1  | Mashruuca Horumarinta Madaaradda                                   |
| <b>Madaxtooyadda</b>                                    | 1  | dhismaha Madxafka Qaranak (museum)                                 |
|   | 2  | Dhismaha Madaxtooyadda Cusub                                       |
|   | 3  | Dhismaha Guryaha Martida ee Goboladaa                              |
| <b>W.Caafimaadka, W.Maaliyaadda &amp; W.waxbarshada</b> | 1  | Mashruuca JPLG   |
| <b>Tacliinta Sare</b>                                   | 1  | Dhismeyaasha Jaamacadaha Burco iyo Sheekh                          |
| <b>W.Boosaha iyo Isgaadhsiinta</b>                      | 1  | Iibsiga Qalabka Boosaha & Isgaadhsiinta                            |
| <b>W.Caafimaadka</b>                                    | 1  | dhismaha Xarumo Caafimaad 3 Xarumo Caafimaad, Hargeysa 2 iyo Oog 1 |
|   | 2  | Dhismeyaasha Balaadhin Xarumaha Caafimaad                          |
|   | 3  | Dhismeyaasha Balaadhin X. Caafimaad                                |
|   | 4  | Dhismeyaasha 10 MCH  |
|   | 5  | Iibsiga Ambulances   |
|   | 6  | Iibsiga Mishiinka Kalyaha Boorama                                  |
|   | 7  | Ibsiga Qalabka Caafimaadka   |
|   | 8  | Mashruuca Cisbitaalada Ceerigaabo & Laascaanood                    |
| <b>W.Dhalinyarada &amp; Ciyaaraha</b>                   | 1  | dhismaha kordhinta Xafiisyada Wasaaradda                           |
|   | 2  | Dhismayaasha Garoonadda Ceerigaabo, Oodweyne iyo Baligubadle       |
|   | 3  | Qabashada Koobka Goboladda   |

|   |    |  |
|---|----|--|
|   | 4  | Mashruuca Sanduuqa H.Dhalinyaradda                             |
| <b>W.Gaadiidka &amp; Jidadka</b>              | 1  | Dhismaha Wadooyinka & Buundooyinka Wadada Ceerigaabo           |
| <b>W.Ganacsiga</b>                            | 1  | Dhismaha Aaga Warshadaha (Industrial) iyo Xafiisyada Goboladda |
| <b>W.H.Biyaha</b>                             | 1  | Dhismaha Sand Dams & Earth Dams (6)                            |
|   | 2  | libsiga Riig   |
|   | 3  | Dhismaaysha Ceelasha   |
| <b>W.H. Maalgashiga</b>                       | 1  | Dhismaha Xafiisyo Wasaaradda                                   |
| <b>W.H. Maaliyadda</b>                        | 1  | Dhismeyaasha W.Horumarinta Maaliyadda                          |
| <b>W. Macdanta &amp; Tamarta</b>              | 1  | Dhismaha Shaybaadhka berbera                                   |
| <b>W. Warfaafinta</b>                         | 1  | Dhismeyaasha   |
|   | 2  | libsiga idaacada Cusub   |
| <b>W.Waxbarashada &amp; Sayniska</b>          | 1  | Dhismaha Iskuulka Haldoor                                      |
|   | 2  | Dhismaha Iskuulka Qorigorod                                    |
|   | 3  | Dhismaha Xarunta Wasaaradda                                    |
|   | 4  | Dhismaha Iskuulka Balikaliil                                   |
|   | 5  | Dhismaha Iskuulka Duruqsi                                      |
|   | 6  | Dhismaha Iskuulka Garadag                                      |
|   | 7  | Dhismaha Laybareeriga Gabiiley                                 |
|   | 8  | Dhismaha Laybareeriga Berbera                                  |
|   | 9  | Dhismaha Laybareeriga Salaxlay                                 |
|   | 10 | Dhismaha Laybareeriga Silaanyo                                 |
|   | 11 | Masharuuca Shaqo Qaran   |
|   | 12 | Mashruuca Dugsiyadda Dayax & Laascaanood                       |
| <b>Wasaaradda beeraha</b>                     | 1  | Mashruuca Abuurbadinta   |
|   | 2  | Mashruuca Beer,Wajaale & Oodwayne                              |
|   | 3  | Mashruuca Dhiraynta  |
|   | 4  | Mashruuca Timirta  |
|   | 5  | Mashruuca Cilmi Baadhista & Fidinta Beeraha                    |
|   | 6  | Mashruuca Badbaadada Beeraha                                   |
|   | 7  | Mashruuca Xog-ururinta Beeraha                                 |
| <b>Wasaaradda Boosaha</b>                     | 1  | Mashruuca Diyaarinta Xarumaha ICT-ga                           |
|   | 2  | Hirgalinat E-government  |
|   | 3  | Raadinta Furaha Dal Ku galka                                   |
| <b>Wasaaradda Deegaanka</b>                   | 1  | Mashruuca seerayaasha Bancawl & Cashuura                       |
|   | 2  | Mashruuca Daryeelka Duurjoogta                                 |
| <b>Wasaaradda Jidadka</b>                     | 1  | Dhismaha wadada Burco iyo Oodweyne                             |
|   | 2  | Horumarinta Wadooyinka   |
| <b>Wasaaradda Maaliyadda</b>                  | 1  | Horumarinta Gobolada Bariga                                    |
| <b>Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta</b>        | 1  | Mashruuca Sahaminta Macdanta & Shidaalka                       |
| <b>wasaaradda X.Xoolaha iyo Kalluumaysiga</b> | 1  | libsiga Doonyaha kalluumaysiga                                 |
|   | 2  | Dhismeyaasha goobaha Kalluumaysiga                             |
|   | 3  | libsiga Qalabka Kaluunka (qaboojiyayaal iyo baraf dhaliyayaal  |
|   | 4  | Mashruuca Tijaabada Taranka Xoolaha                            |
|   | 5  | Masharuuca Qoolcaday & Aroori                                  |
|   | 6  | Mashruuca Daawaynat Xoolaha                                    |
|   | 7  | Mashruuca Xoolo Qaybinta                                       |
| <b>Xeer-Ilaaliyaha Guud</b>                   | 1  | Dhismaha Xafiisyada Xeerilaalinta                              |

## 8. WADAAGAYAASHA MIISAANIYADDA 2020 (Sector Allocation)

Jaantuska 7: Wadaagayaasha Miisaaniyadda 2020



Jaantuska 1: Wadaagayaasha Miisaaniyadda 2020

|                             | 2019                     | 2020                     | Farqi                  | % Farqiga     | % Guud 2020    |
|-----------------------------|--------------------------|--------------------------|------------------------|---------------|----------------|
| <b>Amaanka</b>              | 657,025,835,791          | 709,512,317,712          | 52,486,481,921         | 7.99%         | 34.68%         |
| <b>Maamulka</b>             | 342,266,545,784          | 391,938,588,527          | 49,672,042,743         | 14.51%        | 19.16%         |
| <b>Dhaqaalaha</b>           | 277,048,930,634          | 344,344,067,555          | 67,295,136,921         | 24.29%        | 16.83%         |
| <b>Waxbarashada</b>         | 150,270,542,188          | 196,847,233,514          | 46,576,691,326         | 31.00%        | 9.62%          |
| <b>Caafimaadka</b>          | 90,268,550,602           | 96,528,054,269           | 6,259,503,667          | 6.93%         | 4.72%          |
| <b>Qaybaha kale</b>         | 85,742,250,520           | 96,009,113,469           | 10,266,862,949         | 11.97%        | 4.69%          |
| <b>Kaabeyaasha dhaqaale</b> | 84,151,200,498           | 91,301,799,108           | 7,150,598,610          | 8.50%         | 4.46%          |
| <b>Waxsoosaarka Dalka</b>   | 46,411,928,957           | 54,254,418,603           | 7,842,489,646          | 16.90%        | 2.65%          |
| <b>Biyaha</b>               | 17,529,490,644           | 28,819,080,788           | 11,289,590,144         | 64.40%        | 1.41%          |
| <b>Deegaanka</b>            | 23,569,007,846           | 25,371,489,002           | 1,802,481,156          | 7.65%         | 1.24%          |
| <b>Tamarta</b>              | 7,870,176,536            | 11,073,837,453           | 3,203,660,917          | 40.71%        | 0.54%          |
| <b>Total</b>                | <b>1,782,154,460,000</b> | <b>2,046,000,000,000</b> | <b>263,845,540,000</b> | <b>14.80%</b> | <b>100.00%</b> |

## 9. FAAH-FAAHINTA WADAAGAYAASHA 2020 (2020 budget sectors)

Guud ahaan Wasaaraddaha iyo Hay'addaha dalka waxa la isku raaciyaa oo loo qaybiyaa 11 qaybood waxaanay kala yihiin sidan:

### 9.1. Dhaqaalaha:

Wadaagahani wuxuu ka yahay Miisaaniyadda guud **16.83%** oo u dhiganta **344,344,067,555 SI.sh**, wuxuu muujinayaa korodh ah **24.29%**, dhamaan Hay'addaha ku jira wadaagahan wuxuu tilmaamayaa korodh marka laga reebo Wasaaradda Qorshaynta oo laga saaray kharash aan muhiim u ahayn Miisaaniyadooda.

| Dhaqaalaha |  |
|------------|--|
| 141        | W.qorshaynta iyo Horumarinta qaranka           |
| 151        | Wasaaradda H. Maaliyadda                       |
| 161        | Wasaaradda Ganacsiga, Warshadaha iyo Dalxiiska |
| 331        | Guddiga Qardaraasyadda Qaranaka                |
| 431        | Wasaaradda H. Maalgashiga                      |

### 9.2. Waxbarashada:

Wadaagahani wuxuuu Miisaaniyadda Guud ka yahay **9.62%** wuxuu muujinayaa korodh ah **31%** taasina waxay ku timid mashaariicda badan ee loo qoondeeyey waxbarasha & tacliinta sare, waxaa kale oo lagu xoojiyey mashruuca shaqo qaran oo wadaagahani yahay kan ugu badan ee ka faa'iidayanaya siiba tababarka waxabarshada iyo macallinimada;

| Waxbarashada |                                       |
|--------------|---------------------------------------|
| 221          | wasaaradda wax barashada iyo sayniska |
| 222          | Agaasinka tacliinta sare              |
| 223          | Gudiga Tacliinta Sare                 |

### 9.3. Tamarta

Wadaagahani waxay Miisaaniyadiisu tahay **11,073,837,453 SI.Sh**. Wuxuu muujinayaa korodh ah **40.71%** taas oo ku timid mashruuca Sahaminta Macdanta iyo Shidaalka oo loogu daray Miisaaniyadiisa.

| Tamarta |                                 |
|---------|---------------------------------|
| 171     | Wasaaradda Macdanta iyo tamarta |

### 9.4. Deegaanka

Wadaagahani Miisaaniyadda Guud wuxuu ka yahay **25,371,489,002 SL.Sh**. waxaanu muujinayaa korodh ah **7.65%** oo ka yimid mashaariicda Wasaaradda deegaanka. Halka Hay'adda Udiyaargrowga Afooyinku uu muujinayo hoos u dhac ay sababtay dhismeyaal dhamaaday 2019

| Degaanka |   |
|----------|---|
| 341      | Hayadda u diyaargarowga Aafooyinka iyo Kaydka R |
| 411      | Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reermiyiga |

### 9.5. Maamulka

Guud ahaan Wadaagahani waxay miisaaniyadda guud ka yahay **19.16%** kaas oo u dhiganta **391,938,588,527 SL.Sh.** Sidaa darteed wadaagahani wuxuu ina tusayaa korodh ah **14.51%**. Wasaaradda Cadaalada oo ka mid ah waxay muujinysaa hoos u dhac taas oo ay sababtay kharash laga saaray oo ay lahayd gudida Dib-uhabaynta Shuruucda oo hadda kharashkeeda gaar looga dhigay.

| Maamulka |  |
|----------|--|
| 011      | Qasriga Mataxtooyadda JSL                              |
| 012      | Madax-Weyne Ku Xigeenka JSL                            |
| 031      | Golaha Wakiiladda                                      |
| 041      | Maxkamada sare   |
| 051      | Xeer ilaalinta Guud ee qaranka                         |
| 061      | Hayadda Shaqaalaha dawlada                             |
| 071      | Hanti-dhawrka Guud ee qaranka                          |
| 081      | Xafiiska Mataxtooyadda                                 |
| 083      | Garyaqaanka Guud                                       |
| 091      | W. Arimaha dibada iyo iskaashiga caalamiga ah          |
| 101      | Wasaaradda Cadaalad & Garsoorka                        |
| 103      | Maxkamada hoose  |
| 104      | Guddiga Xuquuqal insaanka                              |
| 111      | wasaaradda Arimaha Gudaha                              |
| 291      | wasaaradda xidhiidhka Golayaasha iyo arimaha dastuurka |
| 292      | komishanka dib-uhabaynta shuruucda                     |
| 321      | Gudiga Doorashooyinka Qaranka                          |
| 391      | Gudiga Maamul wanaaga iyo la-dagaalanka Musuqmaasuqa   |
| 421      | Gudiga Diwaagalinta Ururadda                           |

### 9.6. Caafimaadka

Guud ahaan wadaagahani wuxuu ka yahay Miisaaniyadda **96,528,054,269 SL.Sh.** Wuxuu ina tusayaa korodh ah **6.93%** sida ka muuqata marka gaar-gaar loo qiimeeyo waxuu muujinayaa korodh balse waxaa uu hoos u dhac wayni ka muuqdaa Hay'adda Dhawrista Tayada taas oo laga saaray Mishiinkii Baadhista Daawada iyo Cuntada, Kaas oo ka mid ahaa Mashaariicdii dhamaatay 2019.

| Caafimaadka |  |
|-------------|--|
| 013         | Gudiga Qaranka ee la dagaalanka HIV/AIDS-ka      |
| 231         | wasaaradda H. Caafimaadka                        |
| 232         | Komishanka Qaranka ee Mihnadlayaasha caafimaadka |
| 381         | Hay'adda Dhawrista Tayadda                       |

### 9.7. Kaabayaasha Dhaqaalaha

Sida guud Wadaagahani wuxuu Miisaaniyadda guud ka yahay **4.46%** una dhiganta **91,301,799,108** SL.Sh. Wuxuuna muujinayaa korodha ah **8.5%** marka loo eego sannadkii hore ee 2019.

| Kaabayaasha Dhaqaale |  |
|----------------------|--|
| <b>181</b>           | Wasaaradda Gaadiidka iyo H. Jidadka            |
| <b>211</b>           | Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tignoolajiyadda   |
| <b>251</b>           | Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka iyo Guriyaynta |
| <b>261</b>           | H. Duulista Hawada                             |

### 9.8. Waxsoo-saarka

Waxsoo-saarku wuxuu Miisaaniyadda 2020 ka yahay **54,254,418,603** SL.Sh. waxaanu ina tusayaa korodh ah **16.90%**, inkastoo korodhka Mashaariicdu uu Sanadka n u badanayahay dhinaca kaluumaysiga iyo Xoolaha, hadana Wasaaradda Beeraha waxaa ugu jira saddex Mashruuc oo cusub iyo kuwii hore ugu socday. Hoos u dhaca Miisaaniyadooda waxa sabab u ah dhismayaal iyo gaadiid ka baxay oo Sanadka 2019 fulay.

| Waxsoosaarka |   |
|--------------|---|
| <b>191</b>   | Wasaaradda Beeraha                                |
| <b>201</b>   | Wasaaradda xanaanadda Xoolaha iyo H. kaluumaysiga |

### 9.9. Amaanka iyo Difaaca

Guud ahaan wadaagahani **34.68%** ayuu ka yahay Miisaaniyadda guud taas oo udhiganta **709,512,317,712** SL.Sh, wuxuu muujinayaa korodh dhan **7.99%** , waana wadaagaha ugu Miisaaniyadda badan taas oo ay keenatay muhiimada uu amniga iyo difaacu u leeyihiin waddanka.

| Amaanka iyo Difaaca dalka |                                 |
|---------------------------|---------------------------------|
| <b>082</b>                | Ciidanka ilaalada Madaxtooyadda |
| <b>084</b>                | Hay'adda Sirdoonka Qaranka      |
| <b>085</b>                | Jimciyadda Muj.Sooyaal          |
| <b>102</b>                | Ciidanka Asluubta               |
| <b>112</b>                | Ciidanka Booliiska              |
| <b>113</b>                | Ciidanka Ilaalada Xeebaha       |
| <b>115</b>                | Ciidanka Socdaalka              |
| <b>116</b>                | Ciidanka Dab-demiska Qaranka    |
| <b>131</b>                | Wasaaradda Gaashaandhiga        |
| <b>132</b>                | Ciidanka Qaranka                |

### 9.10. Biyaha

Wasaaradda biyaha oo ah Wasaaradda kaliye ee ku jirta wadaagahan waxay Miisaaniyada guud ka tahay **28,819,080,788** SL.Sh. Wasaaraddan waxaa ka muuda korodha ah **64.4%** taas oo micnaheedu yahay ahmiyadda lasiiyey Biyaha Sanadka n waana meelaha mashaariicda ugu muhiimsani ka fulayso.

| Biyaha Nadaafada iyo Fayodhawrka |                      |
|----------------------------------|----------------------|
| <b>441</b>                       | Wasaaradda H. Biyaha |

### 9.11. Wadaagaha kale (crosscutting Sector)

Wadaagahan waxaa ku midaysan Afar Wasaaradood iyo laba Hay'adood oo dhamaantood ay isugu yimaadaan adeegyada Bulshadu, waxay Miisaaniyadda guud ka yihiin **4.69%** oo u dhiganta **96,009,113,469 SI.Sh.** waxaaynu muujinayaan korodh dhan **11.97%**, waxa loo qorsheeyey Mashaariic badan oo kor loogu qaadayo adeega Bulshada, dhaqanka, akhlaaqda iyo daryeelka bulshada nugal. Guntii iyo gabagabadii guud ahaan Miisaaniyadani waxay muhiimda siinaysaa Aminga, daryeelka bulshada, Dhaqaalaha, Waxsoosaarka, Aqoonsi raadinta iyo kaabayaasha Dhaqaalaha.

| Qaybaha Kale (Cross-cutting Sector) |  |
|-------------------------------------|--|
| <b>121</b>                          | W.warfaafinta, Wacyigelinta iyo dhaqanka |
| <b>241</b>                          | Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta           |
| <b>242</b>                          | Hay'adda Diwaanka sakada iyo samafalka   |
| <b>301</b>                          | wasaaradda shaqogalinta iyo A. Bulshada  |
| <b>311</b>                          | Wasaaradda Ciyaaraha iyo dhalinyaradda   |
| <b>401</b>                          | Hay'adda Qaxootiga iyo barakacayaasha    |


## 10. Soo koobida guud ee Madaxyada Miisaaniyadda 2020

### 10.1. Soo koobida Miisaaniyadda 2020 oo Madaxaysan

Shaxda 13: Soo koobida Miisaaniyadda 2020 oo Madaxaysan

|  | 2019                     | 2020                     | Farqi                  | % Farqiga     | % Guud         |
|--|--------------------------|--------------------------|------------------------|---------------|----------------|
| Kharashka Shaqaalaha                         | 922,366,729,717          | 991,159,240,274          | 68,792,510,557         | 7.46%         | 48.44%         |
| kharashka hawl socodsiinta                   | 463,139,075,825          | 535,720,823,610          | 72,581,747,785         | 15.67%        | 26.18%         |
| Mashaariicda Dawladda                        | 84,210,000,000           | 171,563,089,428          | 87,353,089,428         | 103.73%       | 8.39%          |
| Hantida Raagta                               | 145,205,263,658          | 158,877,455,888          | 13,672,192,230         | 9.42%         | 7.77%          |
| Deymaha                                      | 61,200,000,000           | 75,000,000,000           | 13,800,000,000         | 22.55%        | 3.67%          |
| Kharashka lama filaanka                      | 59,800,000,000           | 61,100,000,000           | 1,300,000,000          | 2.17%         | 2.99%          |
| Kaydaka Qaranka                              |                          | 5,000,000,000            | 5,000,000,000          |               | 0.24%          |
| Kaalmooyinka Dawlada                         | 46,233,390,800           | 47,579,390,800           | 1,346,000,000          | 2.91%         | 2.33%          |
| Mashaariicda Baanka Aduunka                  | 41,821,260,000           | 45,805,700,000           | 3,984,440,000          | 9.53%         |                |
| <b>Total (Excluding World Bank Projects)</b> | <b>1,782,154,460,000</b> | <b>2,046,000,000,000</b> | <b>263,845,540,000</b> | <b>14.80%</b> |                |
| <b>Total (including World Bank Projects)</b> | <b>1,823,975,720,000</b> | <b>2,091,805,700,000</b> | <b>267,829,980,000</b> | <b>14.68%</b> | <b>100.00%</b> |

## Jaantuska 8: Qayb qaybinta kharashaadka oo waaxaysan



### 10.2. Faah-faahinta soo koobida Miisaaniyadda 2020 oo Madaxaysan

#### 10.2.1. Kharashka Shaqaalaha

Kharashka ku baxaya shaqaalaha sannad miisaaniyadeedka 2020 waa **991,159,240,274 SLSh**, kaasoo **48.44%** ka ah miisaaniyadda guud ee 2020. Kharashkani wuxuu ka badan yahay **7.46%** Miisaaniyaddii 2019 oo uu ahaa **922,366,729,717 SLSh**

Taana waxa keenay sababahan hoos ku xusan:

- Macallimiinta dugsiyadda hoose dhexe oo loo kordhiyey mushaharka taas oo kordhisay ilaa 15 bilyan;
- 300 oo macallin oo loo kordhiyey wasaaradda waxbarashadda;
- Tirade ciidamada oo la kordhiyey
- Tirada kooban ee shaqaalaha hay'addaha dawladda ku korodhay;
- Xaqal ciidka shaqaalaha dawladda oo la jaangooyey iyo Daraja badalka shaqaalaha

#### 10.2.2. Hawl socodsiinta

Kharashka loo qoondeeyey hawl socodsiinta hay'addaha dawladda sanad miisaaniyadeedka 2020 waa **535,720,823,610 SLSh**. Marka loo eego sannadkii 2019, oo uu ahaa **463,139,075,825 SLSh**, waxay ka badantahay **15.67%** Miisaaniyaddii hore waana farqi ah **72,581,747,785 SLSh**. Guud ahaan wuxuu kharashkani Miisaaniyadda guud ka yahay **26.18%**. Korodhka kharashkani wuxuu ka tarjumayaa:

- Dardargelinta shaqada hay'addaha dawladda iyo hawlaha amniga;
- Korodhka sanduuqa aqoonsi raadinta, kharashka safaaraddaha iyo lambaradda gaadiidka ee dib u iibinta



- Dawaada Mishiinada Kalyaha oo korodhay 60%
- Iyo Dhamaan Wasaaraddaha iyo haya'ddaha Dawladda oo karashaka hawl socodsiinta loo kordhiyey 5% si siman.

### 10.2.3. Hantida Raagta

Miisaaniyadda loo qoondeeyey Hantida raagta waa **158,877,455,888 SLSh**, waxay Miisaaniyadda Guud ka tahay **7.77%** halka ay ka badantahay Miisaaniyaddii hore **9.42%** oo ahayd **145,205,263,658 SLSh**. Hantida raagta waxaa loola jeedaa dhismeyaasha, Gaadiidka, Mishiinada, Doonayaha iyo hantida raagta ee kale. Waxaana kamid ah hantidan:

- Dhismeyaash Jaamacadaha sida: Jaamacada Sheekh, Jaamacada Burco, Jaamacada Garadag iyo Dhismayaasha Library-yada
- Dhismeyaasha iskuulada Kaladuwan iyo garoomada ciyaaraha;
- Rugaha Booliska (7rugood);
- Dhamaystirka Csibitaalka Ciidanka Qaranka iyo Dhismaha Taliska aagga Ceerigaabo;
- Dhismeyaasha Xarumo Caafimaad oo cusub (Hargaysa -2, Oog- 1) iyo balaadhinta qaar kamida kuwii hore (Badhan, Buuhoodle iyo Balligubadle);
- Dhismeyaasha Xanaanooyin Cusub (7 MCH);
- Iibsiga Gaadiidka kala duwan ee dawladda sida Ambalaasyadda Cusbitalada, Gaadiidka Ciidanka Booliska, Riigaga Qodista Ceelasha iyo Cagaf cagafyadda;
- Iibsiga Mishaanada Kalyaha iyo Qalabkooda (Cisbitaalka Boorama);
- Iibsiga Saanadda Ciidanka
- Dhismayaasha Iskuulada kala duwan

### 10.2.4. Mashaariicda Kale ee Dawladda

Miisaaniyadda loo qoondeeyey Mashaariida kale ee dawlada ee aan ahayn ta Hantida raagta waa **171,563,089,428 SLSh**, taas oo Miisaaniyadda guud ka noqonaysa **8.39%**, waxaanay Miisaaniyaddii hore ee 2019 ka badantahay **103.73%** taas oo ahayd **84,210,000,000 SLSh**.

Tani waxay kutimid Mashaariic badan oo cusub oo la abuuray iyo kuwii hore u jiray oo la xoojiyey, Mashaariicadan waxaynu ka tilmaami karnaa;

- Mashruuca shaqo qaran;
- Mashruuca Caafimaafka iyo waxbarashada ee Sool iyo Sanaag
- Mashaariicda Beeraha
- Mashaariicda Xoolaha iyo kaluunka
- Mahaariicda Deegaanka iyo daryeelka ugaadha
- Mashaariicda Sahaminta Macdanta iyo Shidaalka
- Mashaariicda Hirgalinta E-Government-ka, Samaynta furuaha Dal ku galka Isgaadhsiinta iyo hirgalinta Xarumaha ICT-ga
- Mashaariicda Horumarinta dhalinyarada iyo qabashada koobka Ciyaaraha Gobolada
- Mashaariicda Horumarinta Wadooyinka iyo Madaarada
- Hirgalinta Doorashooyinka Baarlamanka iyo Dawladaha Hoose
- Mashaariicda Horumarinta Gobolada Bariga iyo Maamul daadejinta
- Diyaarinta Aaga warshadaha (Industrial Zone)

#### 10.2.5. Kaalmooyinka Dawlada

Miisaaniyadda loo qoondeeyey Kaalmooyinka Dawladu siiso qayabaha kala duwan ee bulshada waa **47,579,390,800 SLSH** taas oo Miisaaniyadda guud ka noqonaysa **2.33%** waxaanay Miisaaniyaddii hore ee 2019 ka badantahay **2.91%** taas oo ahayd **46,233,390,800 SLSH**.

**Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda**

**Soo Koobida Guud ee Miisaaniyadda 2020**

| Code: Waaxda  | 2019            | 2020            | Farqi          |
|---|-----------------|-----------------|----------------|
| <b>Miisaaniyadda Dawladda Dhexe</b>                   |                 |                 |                |
| 011: Qasriga Madaxtooyada JSL.                        | 819,000,000     | 819,000,000     | 0              |
| 012: Madax-weyne ku-.Xigeenka JSL.                    | 585,000,000     | 585,000,000     | 0              |
| 013: Gudida Qaranka ee la dagaalanka HIV/AIDS-KA      | 2,723,388,882   | 3,280,833,901   | 557,445,019    |
| 021: Golaha Guurtida JSL.                             | 33,279,508,980  | 34,011,332,064  | 731,823,084    |
| 031: Golaha Wakiilada JSL.                            | 36,177,177,438  | 37,363,897,178  | 1,186,719,740  |
| 041: Maxkamadda Sare.                                 | 7,044,363,184   | 7,517,520,040   | 473,156,856    |
| 051: Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka.                  | 8,062,613,108   | 9,928,129,378   | 1,865,516,270  |
| 061: Hay'adda Shaqaalaha Dawladda.                    | 11,210,554,159  | 16,201,882,160  | 4,991,328,001  |
| 071: Hanti-dhawrka Guud ee Qaranka.                   | 11,421,868,030  | 12,766,512,894  | 1,344,644,864  |
| 081: Xafiiska Madaxtooyadda.                          | 127,947,889,667 | 145,524,207,167 | 17,576,317,500 |
| 082: Ciidanka Ilaaladda Madaxtooyada.                 | 24,872,591,016  | 29,811,342,216  | 4,938,751,200  |
| 083: Garyaqaanka Guud                                 | 3,030,799,708   | 4,208,516,972   | 1,177,717,264  |
| 084: Hayadda Sirdoonka Qaranka                        | 14,838,215,049  | 20,273,615,049  | 5,435,400,000  |
| 085: Jimciyadda Muj.Sooyaal                           | 2,235,000,000   | 2,454,350,000   | 219,350,000    |
| 091: W.Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah   | 33,844,049,132  | 47,620,844,707  | 13,776,795,575 |
| 101: Wasaaradda Cadaaladda & Garsoorka.               | 9,511,179,710   | 8,755,582,876   | -755,596,834   |
| 102: Ciidanka Asluubta.                               | 67,628,859,780  | 69,287,666,608  | 1,658,806,828  |
| 103: Max-kamadda Hoose.                               | 31,622,093,081  | 32,350,103,914  | 728,010,833    |
| 104: Guddiga Xaquuqal Insaanka Qaranka.               | 3,102,087,898   | 3,510,385,594   | 408,297,696    |
| 111: Wasaaradda Arrimaha Gudaha.                      | 32,677,568,877  | 37,670,112,752  | 4,992,543,875  |
| 112: Ciidanka Booliska.                               | 125,921,339,523 | 134,785,031,865 | 8,863,692,342  |
| 113: Ciidanka Ilaalada Xeebaha.                       | 17,031,587,286  | 17,876,480,388  | 844,893,102    |
| 115: Ciidanka Socdaalka.                              | 11,786,191,804  | 13,337,298,091  | 1,551,106,287  |
| 116: Ciidanka Dab-Demiska Qaranka Somaliland          | 12,404,171,920  | 13,632,337,236  | 1,228,165,316  |
| 121: W.Warfaafinta, Wacyigelinta iyo Dhaqanka         | 44,226,655,626  | 45,376,093,468  | 1,149,437,842  |
| 131: Wasaaradda Gaashandhigga.                        | 46,067,378,412  | 44,665,876,821  | -1,401,501,591 |
| 132: Ciidanka Qaranka.                                | 279,240,501,001 | 306,288,319,438 | 27,047,818,437 |
| 141: W.Qorshaynta & Horumarinta Qaranka               | 11,931,614,710  | 11,005,169,950  | -926,444,760   |
| 151: Wasaaradda H. Maaliyadda.                        | 240,327,707,436 | 275,978,730,468 | 35,651,023,032 |
| 161: Wasaaradda Ganacsiga, Warshadaha iyo Dalxiiska   | 17,507,245,140  | 49,462,327,287  | 31,955,082,147 |
| 171: Wasaaradda Macdanta & Tamarta.                   | 7,870,176,536   | 11,073,837,453  | 3,203,660,917  |
| 181: Wasaaradda Gaadiidka iyo H. Jidadka              | 43,607,792,874  | 46,506,754,712  | 2,898,961,838  |
| 191: Wasaaradda H. Beeraha.                           | 17,583,292,405  | 16,660,693,515  | -922,598,890   |
| 201: Wasaaradda Xanaannada Xoolaha iyo H. Kalumaysiga | 28,828,636,552  | 37,593,725,088  | 8,765,088,536  |
| 211: Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tignoolojiyada      | 15,320,098,160  | 15,745,805,700  | 425,707,540    |
| 221: Wasaaradda Waxbarashada & Sayniska               | 142,179,088,168 | 187,791,459,458 | 45,612,371,290 |
| 222: Agaasinka Tacliinta sare                         | 5,934,361,158   | 6,381,661,158   | 447,300,000    |
| 223: Gudiga Tacliinta Sare                            | 2,157,092,862   | 2,674,112,898   | 517,020,036    |
| 231: Wasaaradda H. Caafimaadka.                       | 73,871,256,202  | 86,912,449,082  | 13,041,192,880 |

| Code: Waaxda   | 2019                     | 2020                     | Farqi                  |
|--|--------------------------|--------------------------|------------------------|
| 232: Komishanka qaranka ee Mihnadlayaasha caafimadka | 1,173,808,604            | 1,561,037,748            | 387,229,144            |
| 241: Wasaaradda Diinta & Awqaafta.                   | 6,803,138,080            | 9,241,733,392            | 2,438,595,312          |
| 242: Hay'adda Diiwaanka Sakada iyo Safalka           | 3,475,335,046            | 3,752,357,428            | 277,022,382            |
| 251: Wasaaradda Hawlaha Guud,Dhulka & Guriyaynta     | 10,075,157,673           | 11,050,909,543           | 975,751,870            |
| 261: H. Duulista & Hawada.                           | 15,148,151,791           | 17,998,329,153           | 2,850,177,362          |
| 291: Wasaradda Xidh Golayaasha iyo Arimaha Distorka  | 6,616,763,244            | 7,639,527,854            | 1,022,764,610          |
| 292: Komishanka dib u habaynta shuruucda             |                          | 2,000,238,912            | 2,000,238,912          |
| 301: Wasaaradda Shaqagalinta, A. Bulshada & Qoyska   | 11,997,394,670           | 13,181,348,872           | 1,183,954,202          |
| 311: Wasaaradda Ciyaaraha iyo Dhalinyarada.          | 14,252,320,460           | 17,858,671,892           | 3,606,351,432          |
| 321: Guddiga Doorshooyinka Qaranka.                  | 34,283,312,546           | 34,140,054,669           | -143,257,877           |
| 331: Guddiga Qandaraaska Qaranka.                    | 2,671,647,894            | 2,999,313,868            | 327,665,974            |
| 341: Hayada u Diyaargarowga Aafooyinka iyo Kaydka R. | 9,485,728,888            | 8,541,977,224            | -943,751,664           |
| 381: Hay'adda Dhawrista Tayada                       | 12,500,096,914           | 4,773,733,538            | -7,726,363,376         |
| 391: Gudida Maamulwanaaga iyo La-dagaalanka Mus      | 3,500,592,022            | 3,760,376,196            | 259,784,174            |
| 401: Hayada Qaxootiga iyo Barakacayaasha             | 4,987,406,638            | 6,598,908,417            | 1,611,501,779          |
| 411: Wasaaradda Degaanka & Horumarinta Reermiyiga    | 14,083,278,958           | 16,829,511,778           | 2,746,232,820          |
| 421: Guddida Diwaangalinta Ururada                   | 2,530,125,000            | 2,665,363,200            | 135,238,200            |
| 431: Wasaarada H. Maalgashiga                        | 4,610,715,454            | 4,898,525,982            | 287,810,528            |
| 441: Wasaaradda H. Biyaha                            | 17,529,490,644           | 28,819,080,788           | 11,289,590,144         |
| <b>Miisaaniyadda Dawladda Dhexe</b>                  | <b>1,782,154,460,000</b> | <b>2,046,000,000,000</b> | <b>263,845,540,000</b> |
| <b>Miisaaniyadda Mashaariicda Baanka Adduunka</b>    |                          |                          |                        |
| 501: Mashaariicda Bank Aduunka                       | 41,821,260,000           | 45,805,700,000           | 3,984,440,000          |
| <b>Miisaaniyadda Mashaariicda Baanka Adduunka</b>    | <b>41,821,260,000</b>    | <b>45,805,700,000</b>    | <b>3,984,440,000</b>   |
| <b>Grand total</b>                                   | <b>1,823,975,720,000</b> | <b>2,091,805,700,000</b> | <b>267,829,980,000</b> |



## Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda

## Faahfaahinta Qorshaynta Wadaagayaasha Miisaaniyadda 2020

| Code: Waaxda   | 2019                   | 2020                   | Farqi                 | % Farqiga     | % Guud        |
|--|------------------------|------------------------|-----------------------|---------------|---------------|
| <b>Dhaqaalaha</b>                                    |                        |                        |                       |               |               |
| 141: W.Qorshaynta & Horumarinta Qaranka              | 11,931,614,710         | 11,005,169,950         | -926,444,760          | -7.76%        | 0.54%         |
| 151: Wasaaradda H. Maaliyadda.                       | 240,327,707,436        | 275,978,730,468        | 35,651,023,032        | 14.83%        | 13.49%        |
| 161: Wasaaradda Ganacsiga, Warshadaha iyo Dalxiiska  | 17,507,245,140         | 49,462,327,287         | 31,955,082,147        | 182.52%       | 2.42%         |
| 331: Guddiga Qandaraaska Qaranka.                    | 2,671,647,894          | 2,999,313,868          | 327,665,974           | 12.26%        | 0.15%         |
| 431: Wasaarada H. Maalgashiga                        | 4,610,715,454          | 4,898,525,982          | 287,810,528           | 6.24%         | 0.24%         |
| <b>Miisaaniyada loo qorsheeyey Dhaqaalaha</b>        | <b>277,048,930,634</b> | <b>344,344,067,555</b> | <b>67,295,136,921</b> | <b>24.29%</b> | <b>16.83%</b> |
| <b>Waxbarashada</b>                                  |                        |                        |                       |               |               |
| 221: Wasaaradda Waxbarashada & Sayniska              | 142,179,088,168        | 187,791,459,458        | 45,612,371,290        | 32.08%        | 9.18%         |
| 222: Agaasinka Tacliinta sare                        | 5,934,361,158          | 6,381,661,158          | 447,300,000           | 7.54%         | 0.31%         |
| 223: Gudiga Tacliinta Sare                           | 2,157,092,862          | 2,674,112,898          | 517,020,036           | 23.97%        | 0.13%         |
| <b>Miisaaniyada loo qorsheeyey Waxbarashada</b>      | <b>150,270,542,188</b> | <b>196,847,233,514</b> | <b>46,576,691,326</b> | <b>31.00%</b> | <b>9.62%</b>  |
| <b>Tamarta</b>                                       |                        |                        |                       |               |               |
| 171: Wasaaradda Macdanta & Tamarta.                  | 7,870,176,536          | 11,073,837,453         | 3,203,660,917         | 40.71%        | 0.54%         |
| <b>Miisaaniyada loo qorsheeyey Tamarta</b>           | <b>7,870,176,536</b>   | <b>11,073,837,453</b>  | <b>3,203,660,917</b>  | <b>40.71%</b> | <b>0.54%</b>  |
| <b>Deegaanka</b>                                     |                        |                        |                       |               |               |
| 341: Hayada u Diyaargarowga Aafooyinka iyo Kaydka R. | 9,485,728,888          | 8,541,977,224          | -943,751,664          | -9.95%        | 0.42%         |
| 411: Wasaaradda Degaanka & Horumarinta Reermiyiga    | 14,083,278,958         | 16,829,511,778         | 2,746,232,820         | 19.50%        | 0.82%         |
| <b>Miisaaniyada loo qorsheeyey Deegaanka</b>         | <b>23,569,007,846</b>  | <b>25,371,489,002</b>  | <b>1,802,481,156</b>  | <b>7.65%</b>  | <b>1.24%</b>  |
| <b>Maamulka</b>                                      |                        |                        |                       |               |               |
| 011: Qasriga Madaxtooyada JSL.                       | 819,000,000            | 819,000,000            | 0                     | 0.00%         | 0.04%         |
| 012: Madax-weyne ku-.Xigeenka JSL.                   | 585,000,000            | 585,000,000            | 0                     | 0.00%         | 0.03%         |
| 021: Golaha Guurtida JSL.                            | 33,279,508,980         | 34,011,332,064         | 731,823,084           | 2.20%         | 1.66%         |
| 031: Golaha Wakiilada JSL.                           | 36,177,177,438         | 37,363,897,178         | 1,186,719,740         | 3.28%         | 1.83%         |
| 041: Maxkamadda Sare.                                | 7,044,363,184          | 7,517,520,040          | 473,156,856           | 6.72%         | 0.37%         |
| 051: Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka.                 | 8,062,613,108          | 9,928,129,378          | 1,865,516,270         | 23.14%        | 0.49%         |
| 061: Hay'adda Shaqaalaha Dawladda.                   | 11,210,554,159         | 16,201,882,160         | 4,991,328,001         | 44.52%        | 0.79%         |
| 071: Hanti-dhawrka Guud ee Qaranka.                  | 11,421,868,030         | 12,766,512,894         | 1,344,644,864         | 11.77%        | 0.62%         |
| 081: Xafiiska Madaxtooyadda.                         | 72,947,889,667         | 88,424,207,167         | 15,476,317,500        | 21.22%        | 4.32%         |
| 083: Garyaqaanka Guud                                | 3,030,799,708          | 4,208,516,972          | 1,177,717,264         | 38.86%        | 0.21%         |
| 091: W.Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah  | 33,844,049,132         | 47,620,844,707         | 13,776,795,575        | 40.71%        | 2.33%         |
| 101: Wasaaradda Cadaaladda & Garsoorka.              | 9,511,179,710          | 8,755,582,876          | -755,596,834          | -7.94%        | 0.43%         |
| 103: Max-kamadda Hoose.                              | 31,622,093,081         | 32,350,103,914         | 728,010,833           | 2.30%         | 1.58%         |
| 104: Guddiga Xaquuqal Insaanka Qaranka.              | 3,102,087,898          | 3,510,385,594          | 408,297,696           | 13.16%        | 0.17%         |
| 111: Wasaaradda Arrimaha Gudaha.                     | 32,677,568,877         | 37,670,112,752         | 4,992,543,875         | 15.28%        | 1.84%         |

